

**Amaanka dhallinyarada, Amaanka  
Bulshada**

# **Arrimaha Laga hadlayo**

- Sidee baad u gargaari kartaa ilmahaaga si uu uga fogaado lug ku lahaanshaha arrimaha la xiriira burcadnimada, uguna barbaaro Nabadgeliyo, Caafimaad iyo rajo (amal)
- Sidee baad uga faa'ideysan kartaa adeegyada ka jira bulshada aad ku nooshahay, kuwasoo caawini kara adiga, ilmahaaga, iyo deggaankaaga

# **Waa maxay dhallinyaro Budhcad ah?**

Waa koox dhallinyaro ama dad waaweyn ah oo is-baheyystay, xiriir khaas ah leh, kuna jira hawlo ama arrimo sharci darro ama dembi ah; waxay noqdan kuwa leh xiriir dabacsan ama mid adag oo isku dooban, xeer u dhiganna ku socoda.

## **5ta sababoodee ugu waaweeyn ee dhallinyaradu ugu biirto budcadka.**

- Dareemid inuu ka tirsan yahay ama mid yahay
- Inuu ka helo difaac ama nabageliyo
- Saboolnimo iyo lacag la'aan.
- Daneynta iskuulka oo dhunta.
- Waalidka oo aan war ka heynin ama aan ka warqabin.

# **Sababah dhallinyaradu aysan ugu biirin budhcadnimada**

- Waxay xiriir wanaagsan la leeyihiin waalidkood, walaalahood, saaxiibadoo, iyo xubnaha beesha(dareen ka mid nogosho)
- Dugsigooda ayey ku dadaalan.
- Waxay muujiyaan xiiso iyo waqtii ay u helaan cayaarah jirdhisca, musikada iyo farshaxanka.
- Waxay helaan fursad ay ku kororsadaan aqoontooda si ay u dareeman guul ay gaareen
- Waxay leeyihiin rajo iyo garasho ay ku hogamiyaan noloshooda.

# **Caruurta Da'doodu u dhexeyso 6 ilaa 12 sano**

- Waxay ka koraan Caqliga
- Waxay ka koraan Jirka.
- Waxay ka koraan Dareenka
- Waxay ka koraaan dad dhexgalka ama dad ladhaqanka
- Waxay ka koraan xagga caqiidada amd diinta (su'aalo ayey ku weydiyaan)

# **Waxyaabaha Khatarta ah.**

- Dabeeecad qalafsan, uusan/aysan xakameyn karin xanaaqa.
- Hubsasho la'aan iyo fudeednimo.
- Waxbarshada oo ku adkaata
- Naxariis darro iyo asagoo dadka kale aan xaq dhawrin.
- Dagaal gelid joogta ah ama soo noqnoqota
- Dhibaato ka heysta in u sameeysto saaxiibo ama raacid saaxiibo xun xun.

# **Waa maxay firforcoonaanta ama isku kalsoonanta**

- Firfircoonaanta ama isku kalsonantu waa qofka leh awood ama garsho uu kaga hortago, ku yareeyio , ama kaga guulaysto marxalad adag ee dhibaato dhacda keeni karta.

# **Caruurta toosan (isku kalsoon) waxay leeyihiiin**

Dareen ka mid ahaansho iyo kalsooni ay ku  
qabaan reerahooda, iskuulkooda iyo  
beelahooda.

# **Caruurta toosan (isku kalsoon) waxay dareemaan**

- Amaan ama nabdgeliyo gaar ah gurigooda dhexdiisa iyo bulshada ay ku noolyahiin.

# **Caruurta firfircoон ama isku kalsoон waxay leeyihiiн**

- Dareen iyo niyad wanaagsan ee rajo ku salaysan.

# **Caruurta toosan (isku kalsoon) waxay jecelyihiiin**

- Aadista Iskuulka (Dugsiga)

# **Caruurta firfircoon ee isku kalsoon waxay leeyihiin**

- Xannaaneynta iyo daryeelka qof weyn oo nolosha la qaybsada.

# Maxaan ka qaban karanaa

## GURIGA

- La qaado caruurtaada waqtii fiican;
- Si fiican u dhageyso caruurtaada;
- Ogow waxyaabaha ilmahaagu jecelyahay;
- U macnee sababaha ka dambeeyaa nidaamka guriga si ilmuu u kala saaro waxa fiican iyo waxa khaldan;
- Ku dayasho fiican u noqo ilmahaaga;
- Ilmahaaga kula dadaal dabeeecad fiican ee xannaaneyn, tixgelin, iyo u dabacsanaan dheddooda ah.

# Maxaan ka qaban karanaa GURIGA (socota)

- Ku barbaari caruurtaada inaysan ogolaan ama aysan noqon hayi-raac caruurta kale.
- Ku caawi caruurtaada inay yeeshaan xirfado ay ku xallin karaan ama kaga hortagi karaan dhibaatoyinka.
- Codso in aad ogaatid meesha ay joogaan ama ay ku maqan yihiin marwalba

# **Maxaan Qaban karnaa**

## **Dhanka Skuulka**

- Baro oo la xiriir macalimiinta ilamahaa ka hor intaysan dhibaato iman;
- Ilmahaaga ka qayb-gali hawlaha ka socda Skuulka sida ciyaaraaha, kooxda heesta, iyo ciyaaraaha kale;
- Ka mid noqo guddiga waalidiinta iyo macalimiinta;
- Waqtigaaga ku tabaruc Skuulka ama raac safarada Skuulku qaban-qaabiyo.

# **Maxaan Ka Qaban Karnaa**

## **Dhanka Beesha ama Deggaanka**

- Ku biir oo ka mid noqo guddiga ijaartayaasha ama kooxaha kale ee bulshada, diinta, dhaqamada, iwm;
- Ka qayb-qaado abaabulidda xaflado ama kulan xaafadeed ee ka dhaca deggaanka aad ku nooshahay.
- Gaarsii oo u sheeg Poliiska wixii xadgudub ama dembi ah oo aad aragto.

# Calaamadana lagu garto in qof dhaallinyaro ah uu lug ku leeyahay budcadnimo (gang activity)

- Dadaalkiisa waxbarasho oo hoos u dhaca si lama filaan ah.
- Dood ama muran lama filaan ah xagga waalidka iyo macalimiinta.
- Asxaabta uu bedbedelo iyo asagoo gooni isku ururiya.
- Waxaa ka soo uraya ama ka muuqda calaamado Sigaar , Qamri, ama Daroogo.
- Asago ay Boliiska iska horiymaadan.
- Asagoo si deg-deg ee xad dhaaf ah wax u iibsada.
- Wuxaad ku arkeeysaa wax burburin, iyo dabeeecad qalafsan
- Haysasho lacag badan oo aan la aqoon meeshay ka timid
- Isagoo wata hub am uu qariyo wixiisa gaarka u ah.

# BANDOO

- Qofkii ka yar 16 sano looma oqola inuu joogo meelaha furan ee la iskugu tago ama lagu caweeyo inta u dhaxeysa 12ka habeenimo ilaa iyo 6da aroornimo iyadoo uusan la socon qof weyn oo ka masuul ah (qaybta sharciga 75)(5))
- Waxaa laga yabaa in waalidka loo cuskado sharciga u degsan gobolka (la ganaaxo ugu badnaan \$ 1000), waa hadii la ogaado in qofka dhallinta yar jabiyey  
**BANDOOGA.**

# **Sharciga Qeexaya Waajibka Waalidiinta**

- Waalidiintu waxay mas'uul ka yihiin hanti dhuminta, burburinta ama halleynta ay geystaan caruurtoodu (waa haddii ay ka yar yihiin 18 sanno), waxaa intaas ka baxsan haddii ay caddaato inaysan ula kac ahayn, waalidku ku dadaalay inuu ilmihiisa ilaasho, ama uu ku dadaalay ka hortegidda in dhibaato dhacdo.

# **Wargelinta Poliiska**

## **“wacitaanka habboon”**

- 9-1-1 Naf halis ku jirta ama dhib ama dembi markaas dhacaya.
- 613-230-6211 Wixii kaloo gargaarka deg-deg ah.
- 613-230-1222,ext 7300 Markaad sheegeyso tuug wax xadaya,hanti la burburinayo,Qof la waayey ama gaari la xaday.
- 613-236-1222 Saldhigyada Poliiska ee xaafadaha iyo wixii kaloo warar ah.
- 236-1222 ext. 5355 Laanta caawinaada dhallinyarada; Maamulaha Laanta 236-1222 ext. 5342
- 613 233-TIPS (8477) Ka hortegayaasha Dembiyada

# **Adeegyada Beesha**

**Waan wada shaqeeyn karnaa.**

Halkan waxaad ka heli kartaa hay'adaha iyo barnamijyada ka jira beeshaada ee kugu caawin kara inaad korisid caruur toosan ee isku kalsoon.

# **Amaanka Dhallinyarada, Amaanka Bulshada**

- Waxaa soo diyaarshay: Chelby Marie Daigle
- Iyadoo ka wakiil ah Isutagga Xarumaha Caafimaadka iyo Adeegyada ee Ottawa
- Waxaa maalgeliyey Ka-Hortagga Dembiyada Ottawa